



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Ogoosto 6, 2021-ka

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka, isaga oo ka wakiil ah Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Oregon
Ujeedada: Boosas laga heli karo Guddiga Xuquuqda Aadanaha: ku soo biir maanta!

Boosas dhowr ah oo shaqo oo ka bannaan Guddiga Xuquuqda Aadanaha oo cusub ayaa weli loo baahan yahay in la buuxiyo. Fadlan tixgeli in aad codsato ama tani u dirto dadka kale ee ay dhici karto in ay daneynayaan fursadan gaarka ah.

Fadlan tixgeli codsashada in aad xubin ka noqoto Guddiga, haddii aad tahay:

- walaalka qof qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD), ama
- qayb ka tahay urur u dooda naafanimada

Ma ku habboon tahay mid ka mid ah doorarkaasi? Ma daneynaysaa xuquuqda dadka? Haddii ay sidaasi tahay, fadlan codso!

Labadan boos ee shaqo waxay codka dadka naafada ah iyo qoysaskooda u keenayaan shaqadan muhiimka ah.

Guddiga Xuquuqda Aadanaha waa natiiyo ka dhalatay Xeerka Oregon ([Sharciga Senate-ka 493](#)). Doorarka Guddigu waa in ay ilaaliyo sharafta iyo xuquuqda aasaasiga ah ee aadanaha ee dadka qaba I/DD. Guddigu waxay noqon doontaa ilo muhiim ah oo ay leeyihiin dadka ka tirsan I/DD ee ku nool Oregon waxaan dhiirigelinaynaa qof kasta oo daneynaya ka mid noqoshada xubin ka tirsan Guddiga si uu waxyaabo dheeraad ah uga ogaado iyada.

Sharciga ayaa si gaar ah u tilmaamaya xubinimada dadka ee doorarka qaarkood (sida ahaanshaha qof qaba I/DD ama adeeg bixiye). Waxaa sidoo kale muhiim ah in Guddigu ka turjunto kala duwanaanshaha gobolkeena iyo dadka aan taageerno.

Fadlan fiiri warqada ku lifaaqan wixii faahfaahin ah ee ku saabsan xubinimada iyo sida loo codsado. Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka ayaa hadda aqbalaaya [codsiyada](#) loogu talagalay xubnaha ka tirsan Guddiga Xuquuqda Aadanaha. Fadlan codso ka hor Noofambar 1, 2021.

Waxaan kugu dhiiri gelinaynaa in aad si guud u wadaagto warqada. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan Guddiga ama boosaska shaqo ee bannaan, fadlan xiriir Brooke Hall, 971-707-3847, brooke.m.hall@dhs.oregon.gov.

Fadlan naga caawi sii gudbinta hadalka!

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la,

dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo

www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers